

SIDAN AYAAD KU HELI KARTAA TALLAALKA KORONA TAMPERE

Qofkasta oo ka weyn 12 sano wuxuu heli karaa tallaalka korona oo lacag la`aan ah. Difaaca tallaalka wuxuu u baahanyahay laba goor oo tallaalka ah. Tallaalka waxaad ka heli kartaa goobta tallaalka ee Ratina iyo xarumaha caafimaadka. Goobta tallaalka ee Ratina waxa ay furan tahay ilaa 10.10.2021.

Tallaalka waxaad ka heleysaa **ballan la`aan** goobta tallaalka Ratina (Ratinan rantatie 1):

- isniinta - jimcaha saacadda 8-18 (ilaa 10.10.2021)
- sabtida 2.10., axadda 3.10., sabtida 9.10. iyo axadda 10.10.2021 saacadda 8-14

Ballan la`aan ayaad iman kartaa goobta tallaalka Hatanpää, Hervannan, Linnainmaan, Tammelakeskuksen iyo xarunta caafimaadka Tipotie isniinta-jimcaha 11.-15.10.2021 saacadda 8-18.

Tallaalka koronaha oo ballan la`aan lagaga helayo Hervanta:

Wakhtiga: jimce 1.10. iyo 8.10. saacadda 11-18

Goobta: Suuqa xarunta ah ee Duo, waaxda Laanqeerta Cas, Tampuri PopUp Hervanta, waxaa laga soo galayaa dhinaca Insinöörinkatu

Ama waad ka qabsan kartaa ballan goobta tallaalka ee Ratina ama xarumaha caafimaadka:

- soo wac lambarka 03 5657 0023 (maalin kasta saacadda 7-22) ama
- internetka: www.tampere.fi/koronarokotukset ama
www.tampere.fi/covid19vaccinations

Xasuusnow tallaalka labaad ee xoojinta

Ballanta tallaalka labaad waxaa lagu siinayaa marka aad qaadaneysid tallaalka koowaad. Waad soo hormarin kartaa tallaalka labaad haddii tallaakii hore ay kasoo wareegtay ugrayaan lix asbuuc. Qabso ballan ama tag ballan la`aan goobta tallaalka ee Ratina.